GELBISKII GEERIDA

Cabdiqadir Dayib Askar

Dhawaqa aan maqlayey wuxu ahaa mid aad u daran oo aan ku sigtay in ay dhagahu i qarxaan. Dhawr il-bidhiqsi gudaheed, waxa soo dhacday laambadii ii shidnayd, dabadeedna ku burburtay miiskaygii dushiisii. Aniga oo naxsan ayaan day-mooday daaqadii qolka aan ku jiray, waxa meel durugsan iiga muuqanayey dab aad u weyn iyo uuro is-wata oo hawaddii wada qabsaday.

Bannaanka qolka hadaan u soo booday, waxa aan arkay dadkii oo wada yaacaya. Waxa mar keliya isla wada oogsaday oohinta iyo baroorta dadka. Marka kadib ayaan bushaqadaydii gacanta la sii haleelay, dabadeedna cagaha wax ka dayey.

Waa meel aan ka fogayn xafiiskayga oo qiyaastii ilaa tobon guri dhexeeyaan Waxa is-dhex daadsan maydad aad u badan iyo dhaawacyo culus. Waxa ay indhahaygu markiiba halacsanayeen hilibka dadka ee sida qurub-qurubka ah dhulka u quban. Gacan qof oo dhiiggu tifiqda hayo ayaa iyana indhahaygu ku dheceen. Hareertayda waxa yaaley madax soo go’ay oo indhihii qalaleen.

Qalfoofka gaadhiga gubtay ayaan arkayey oo meesha yaallay. Gaadhigu aad buu u bes- beelay oo ay adkayd in laga soo baadi-sooco biraha kale ee oogadda dhulka ku filiqsan. Waxa si weyn iskugu dhex daadsanaa quraaradihii jab-jabay, burburkii dhismaha iyo meydadka dadkii goobta fadhiyey.

Haa goobta waxa ka dhacay qarax weyn cabbaar yar ka hor, ka soo dhamaan magaallada gilgilay. Waxa meesha is-wada dhex yaacayey dad aad u tiro badan, askartuna waxa ay rasaasta u ridayaan kor iyo hoos, waxa ay u eekaayeen kuwo ay ka luntay xasiloonidii.

Waxa ii muuqday haween barooranaya oo qaarkood ahayd mid aad u adag, unna naxdin badan. Dhawaaqa dhooliga dhaawaca guraya iyo dhiillada meesha ka jirtay ee dhawaqeedu uu dhegahayga ku soo dhacayey, indhahaygana ku arkayey, aad bay iiga argagax- gasheen.

Waxa aad u fiiriyey madaxyada dadka goobta ku go'ay. Aniga oo arki karayey ilaa sodomeeyo qof oo meydkoodu gubtay, qaar kalena jidhkoodu googay. Meydadka waa kala firidhsanaayeen, qaarkoodna wayba isku dhageen oo waxa hoos qul-qulayey dhiig badan.

Anigu waxa aan durba bilaabay shaqo aan la ii dirsan. Waxa aan baadhayey gaadhiga goobta ku qarxay iyo raadka uu reebay. Iyada oo ay ujeedadaydu ahayd helidda astaamo laga tix-raaci karo cidda fulisay iyo walxaha loo adeegsaday.

Maalmahaas ka hor uun baan ka soo laabtay safar aqoon-korodhsi oo aan ku qaadanayey Saldhiga Ciidamadda Maraykanku ku leeyihiin Dalka Jabuuti. Taas oo qayb ka ahayd waajibaadkayga shaqo ee aan ugu adeegi jiray shirkad amaanka ka shaqaysa oo xarun ku leh magaalada Niyuuyook. Shirkadaas, oo si hoose u caawin jirtay xarunta Nabad-suggida

Soomaaliyeed, arrimaha la xidhiidha xuuraanka iyo daba-gelka fal-danbiyeedada caalamiga ah.

Waxa aan si deg-deg ah u xidhay gacmo-gashi cadcad oo aan jeebka danbe ee surwaalkayga tuutaha ah kuwatay. Waxa aan kolba is-taagay goobo kala duwan oo isla meesha qaraxu ka dhacay ah. Jiho kasta waan ka maray, waxa aanan siyaalo kala duwan u suureeyey sida gaadhigu goobta u soo galay iyo qiyaasta xawaaraha uu ku socdayba.

Maskaxdaydu waxa ay dib u xasuusatay goobtu sida ay ahaan jirtay: madal qaxwe macaan lahayd, dhallinyaro badanina ku caweyn jireen, wakhti badana aan habeenkii ka qaxweeyay. Wuxu ahaa hudheel si farshaxanimo ku dheehan tahay loo qurxiyey. Waxaana laha Guuleed Boocow oo aan isku niqiin qurbaha, muddo badana aan ka wada shaqayn jirnay arrimo la xidhiidha jaalliyada Soomaaliyeed ee dalka Kanada.

Aad ayay goobtu u gubatay, burburka baahsan ee indhahaygu qaban karayeena ma ay ahayn laga wada bogan karayey. Waxa soo dumay dhiska dabaqii labaad oo ay ku xidhnaayeen quraarado iyo biro ‘almuuniyam’ ah. Kuwaas oo si aan kala- hadh lahayn u soo daatay, oo goob kasta oo hudheelka ah ku filiqsanaa. Cabbaar kadib, waxa aan dhex lugeeyey meydadkii goobta daadsanaa, anniga oo kolba mid ka dul-talaabaysanaya. Waxa aan u dhawaaday iridda hore ee laga soo galo hudheelka. Taas oo qiyaastii iila muuqatay in gaadhiga wax qarxiyey markii hore xoog ku soo jiidhay. Waxa aan eegay birtii amaanka oo aan waxba qabin. Haddana

waxa aan arkay qolkii ciidanka ilaalada goobta oo aan waxyeelo weyni aanay soo gaadhin. Waan yaabay!

Waxa aan baadi-goobay askartii goobta ilaalinaysay, mise waa dhaawac oo waxa lagula sii ordayaa gaadhiga dhooliga ah ee bannaanka yaal. Waan sii amakaagay! Waxa iga daaddegi weyday birta amaanka ee aan wax buurrani gaadhin, askariga dhaawaca ah iyo qolkoodii oo aanay wax dhibaato ahiba ka muuqan. Inta aan beerka dhulka saaray ayaan xidhay muraayadii madaxa ii saarnayd. Meel aan sidaas iiga fogayn waxa aan ka arkay waraaqo ay dabayshu dhinac u eryeyso, kuwaas oo aragoodu iga mashquuliyey baadigoobkii aan ugu jiray walxihii qaraxa.Aniga oo ka niyad-jabsan waxa dhacay si hal-haleel ah gacanta ula tiigsaday buuggii yaraa ee dabayshu waday. Mise waa baasaboor aad u gubtay oo jeldigii sare iyo qaybta warbixinta qofkuba maqan yihiin. Sida loo aqoonsado cidii lahayd way adkayd.

Deg-deg baan ugu riday bac yar oo aan kala soo baxay bushqadii halka danbe ii sudhnayd. Waxa aan la soo baxay kamaradii dabadeedna sawiro badan goobtii ka qaatay. Inta aan telefankii dhegta saaray ayaan dalbaday gaadhigaygii shaqada. Gaadhigii oo ciidan badan ilaalinayaan ayaa muddo yar gudaheed igu soo gaadhay, markaas baan darawalkii amray in uu i geeyo xeraddii nabad-sugidda.

Maalintaa jidhkayga waxa roortay jidhiidhico tin ilaa cidhib. Waxa aan arkay dhiig kooban oo sankayga ka soo tifiq leh. Inta aan is-taagay ayaan suuliga u cararay, warqadii suuliga tiilna isku qabtay.

Maalintaas, waxa ay ii ahayd jewi adag iyo nolol beddelan. Waxa ii sawirmay meydadkii dadka aan waxba galabsan ee sida arxanka-daran u le'day. Muuqaalkii foosha xumaa ee qaraxu ka tagay, oohintii iyo jibaadkii ka baxayey dadkii goobta lagu dhaawacay.

Waxa aan dib u furay xog-ururiyihii ciidanka, aniga oo si niyad xun indhaha ula sii raacaya sawirka qofkan aan garanayo.

Naftaydayda ayaan dib u haaraamay, aniga oo isku canaanaya in aan ahay dambiile iyo qof dhoohan oo iska daa inuu baajiyo qaraxe, haba yaratee aan sii ablo-ablayn karin qaraxaas ummada badan galaaftay. Miridho kooban gudahood, waxa maskaxdayda ku soo wada dhacayey muuqaallo kala duwan iyo male-awaal aad u badan oo aan naftayda kula shawrayo. Waxa aan is-weydiiyey maxaa is-qarxiyaha gaadhsiiyey in uu naftiisa ilaa heerkaasi u sadqeeyo? Maxaa cadhada daran geliyey? Muxuu u haligay nolosha dadkaas cawaynayey ee haddana ay diinta wadaageen? Mise diintiisa ayaa diintooda ka duwanayd? Mise qofnimadiisa ayaan ka qeexin duwanayd kuwooda? Ma cid kale ayaa dirsatay mise isagaa ahaa dirane fullinaya amar rabaani ah oo la faray?

Waxa mar keliya i wada saaqday cadho daran, culays-maskaxeed iyo cidhiidhi nololeed.

Walaalkay muddo dheer is-ma aanu arag. Waxa aan kala maqnayn qiyaastii saddex sannadood oo aan badanka ka shaqaynayey Barriga Afrika. Abshir wuxu ahaa wiil aad u maskax badan oo aan si gaar ah u jeclaa. Wuu igu dhalasho xigay, waxa aanan ka weynaa laba sanno.

Waxa aanu ahayn walaalo dhib iyo dheefba soo maray, soonna wadaagay. Guud ahaa waxaanu ahayn afar walaalo ah: aniga, isaga iyo weliba laba hablood. Hooyaday iyo aabbahay waxa ay kala tageen in yar kadib markii aan ka guurnay Mareykanka ee aanu degnaasho rasmi ah ka dalbanay dawladda Kanada.

Aad ayaanu berigaa u yar-yareyn, dil-dilaaca ku sii kordhayey wada-noolashihii qoysakayga ma aanu sii odorsi karayn. Anaguna waxa aanu si aayar aayar ah u noqonay reer ba'ay oo kala irdhoobay. Xidhiidhka annaga iyo aabahayo marnaba ma wanaagsanayn, duruufihii adka ee qurbaha nagu haleelay ayaa noo saamixi waayey in qoyskaygu sii waaro. Dabadeedna aabahayo muddo markuu Kanada sii joogay, wuxu ku laabtay dalkii oo uu ganacsi ka furtay, reer cusubna ku guursaday magaalada Boosaaso.

Marar badan oo uu naga soo war doonay waxa war ah oo farxad geliya nagalama uu kulmi jiray. Waxana si joogto ah caqabad noogu ahayd dareenka hooyaday oo si weyn u dhaawacmay. Taas oo nagu dagaali jirtay

in aanu la xidhiidhno, ‘aabbe naga dad doorsaday, oo meel kale looga yeedhay.’

Abshir, wuxu ahaa wiilka xaafaddayda noogu waxbarashada jecel. Waxa aan dareemi jiray inuu lahaa hibo gaar ah, una dheerayd maskax furnaan iyo dhiirranaan xad dhaaf ah.

Ma xasuusto qiyaastii markii u horraysay ee uu u xuub-siibtay xag-jirnimada diinta, waxa aan se maqli jiray marar badan in ay saaxiibeen wiil carab ah oo dalka Yemen ka yimid iyo koox kale oo Suudaaniyiin ah oo ay isku fasal ahaayeen.

Waxa ay ahaayeen koox arday qurbaha ku kortay ah oo jecel dhaqanka diinta Islaamka ah. Marar badan ayay si wada-jir ah uga codsadeen maamulka jaamacaddooda in la siiyo goob ay ku tukadaan salaadaha xilliga ay waxbarashada ku jiraan. Taas oo markii danbe loo yeelay dalabkoodii.

In kasta oo Abshir arrintaas fekerkeeda lahaa, haddana asxaabtiisu gaar ahaan kuwa Suudaan ka yimid waxa ay u qaabaysnaayeen koox abaabulan. Waxa ayna xubno ka ahaayeen urur- diimeed ka jiray dalka Kanada oo lagu magacaabi jirey Xisbul-Janna.

Waxa aan dareemi jiray is-beddelka qofnimada iyo damiirka Abshir taabtay. Wuxu mar kasta sidan jiray kutub diiniya oo af- ingiriis ku qoran.

Markii hore, isna nama shiddayn jirin anaguna hawl kuma aanu yeelan jirin. Maalin danbe ayaan si weyn iskugu dhacnay, kadib markii uu amar siiyey hablihii aanu walaalaha ahayn, kuna qasbay in ay dhar asturan xidhaan iyo weliba indho- shareer. Aniga oo u arkayey badownimo iyo in uu ku xad-gudbayo rabitaankoodii shaqsi iyo xaqooda doorasho.

Maalintaas aad ayaan iskugu buuqnay labadaydu. Walaalkay wixii intaas ka danbeeyey ma uusan jeclaysan jirin la sheekaysigayga, waayo wuxu ii arkayey qof dhaqanka reer galbeednimadu ku fogaatay oo aan dan iyo muraad ka lahayn in nolosha lagu asteeyo asluub diimeed.

Abshir, wuxu si aayar-aayar ah iskugu beddelay qof aammusan oo aan cidnaba wax ku darsan, gaar ahaan marka uu guriga nala joogo. Wuxu isku mashquulin jiray daawashada telefishanada waddamada Carabta gaar ahaan Telefeshinka Al jazeera oo uu aad ugu kalsoonaa soo-tebintooda wareed ee dunida Islaamka ah.

Maalin annaga oo dhamaantayo wada cashaynayna, iskana warsanayna nolol-maalmeedkaygii ayuu wuxu noo daaray warkii Al Jazeera. Waxa mar keliya indhahaygu qabteen muuqaalka carruur yar-yar iyo hooyooyin barooranaya oo dhismayaashii ay ku jireen gantaalo lagu weeraray dhanka jiidda Qaza.

“Bal eega, maxay dadka masaakiinta ahi galabsadeen ee loo laynayaa?” ayuu si cadho leh noo su’aalay. Kama aan fel-celin. Walaashaydii yarayd

ayaa se u jawaabtay oo ku tidhi: “Mar kasta Beriga Dhexe waa iska sidaas!” Habeenkaas, Abshir ma aanu cashayn. Inta uu is-taagay ayuu maqsinkiisii hurdada iska galay. Annaguna halkii ayaanu ka sii qos-qoslanay oo kolba sheeko cusub isku maaweelinaynay.

Abshir wuxu la soo baxay dabeecad qalafsan oo aanu lahaan jirin. Markii hore wuxu ahaan jiray qof bashaash ah oo weji furan. Bal se intaa wixii ka danbeeyey wuxu isku badalayey qof af-gaaban misana cadho badan.

Maalin Axad ah oo aan daawanayey filin cusub oo maalmahaas soo baxay ‘Taken 3’ ayaan ku war helay sawaxan badan oo daaradda gurigayga ka baxaysey. Shaadhkaygii baan la booday dabadeedna si dhakhso leh dabaqii hoose ugu daadegay.

Mise waaba ciidan aad u tiro badan oo hor-tuman gurigayga. Waxa sheedda iiga muuqanayey walaalkay Abshir oo katiinadaysan, dhinac gaadhigii askartana loo sii wado. Kor ayaan u qayliyey aniga oo ku ordaya dhinacii loo sii waday. Bal se iima ay suurtogelin in aan gaadho waxaana i joojiyey Taliyihii ciidanka. Wuxuu iga codsaday in aan ku soo booqdo Saldhiga Qaybta 3aad, ee Eglinton.

Deg-deg ayaan ugu anba-baxay dhankii saldhigga, waa se la ii oggolaan waayey in aan helo faahfaahin la xidhiidha xidhitaanka walaalkay Abshir.

Waxa se xan ku maqlay in walaalkay iyo koox kale oo Suudaaniyiin ah Maxkamadda la geynayo, loonna haysto kiis xasaasi ah.

Sugitaanka dharaartii xigtay ayaa igu dheeraatay. Miridhadu waxa iiga dhignaayeen sidii aan tirinayo maalmaha sannadka oo dhan. Aniga iyo qoyskaygiina waxa nala soo deristay werwer iyo walaac cusub. Xog dhamaystirana kama aanu hayn waxa walaalkayo galabsaday ee ay askartu u xidhatay.

Maalintii xigtay, ayaanu maxkamaddii ku kalahnay si aanu uga qaybgalno dhagaysiga kiiska dacwadda walaalkayo loo haysto. Waxa mar kaliya soo wada galay Abshir iyo koox dhallinyaro ah oo silsilado lagu xidhay oo aad loo ilaalinayo. Cabbaar kadib, waxa isna soo fadhiistay garsoorihii Maxkamadda oo ahayd islaan iska-dhal ah.
Dooddii baa la amray in ay bilaabanto. Anaggana dhagta ayaa na taagan oo u qaadan-waa baa naga soo hadhay. Walaalkay Abshir iyo kooxdii kaleba, waxa lagu soo oogay in ay weerar ku qaadeen laba arday oo caddaan ah, dhaawacyona gaadhsiiyeen. Sidoo kalena ay burbur gaadhsiiyeen qalabkii jaamacadda.

Bal se garsooraha Abshir, wuxu ku doodayey in dhallinyarta cadaanka ahi aflagaaddo u geysteen diinta Islaamka, iyaga oo ku tilmaamay in ay yihiin ‘shar-wadayaal argagixiso ah’.

Maalintaas uu Abshir maxkamada joogay aad ayuu ilmaynayey, ciil badan baana ku gadhoodhsanaa. Foolkiisa waxa laga akhrisanayey niyad xumo iyo cadho daran. Hooyaday oo i ag fadhiday qudheeda ilmo ayaa dhabanadeda qoysay. Dhammaantayo dareenkayga wuu kacasanaa anagga oo ka xun dhibaatada xoriyad la'aaneed ee walaalkayo la soo daristay.

Maxkamaddii, waxa ay soo afjartay dhagaysigii dacwada. Nasiib xumase walaalkay Abshir waxa lagu xukumay xadhig dhan lix bilood.

Abshir waxa u bilaabamay nolol xabsi oo adag. Da'diisa oo yarayd awgeedna, waxa ay u ahayd xaalad kale oo kelinimo iyo rafaad wadata. Annaga waxa ay noo ahayd wehel la'aan.

Muddaddii koobnayd ee Abshir xidhnaa, waxa isbedel weyni durba ku dhacay muuqaalkiisii duleed. Wuxu noqday nin dhillan oo timahiisii madoobaa ay soo taraxday cirro madaxiisa qabsatay. Indhahu wey goteen, dibnahiisuna way qar- qarxeen ilaa diirku ka dhacay debintiisa hoose. Jidhkiisu guud ahaan, wuu tamar darnaaday. Waxa aanu cuntadii xabsiga ka qaaday xannuunka gaas-calooleedka

Muddo kadib waxa aan ku biiray ciidanka bilayska Kanada, waxa aanan ka noqday xubin ka hawlgasha qaybta denbi-baadhista Kooxda 55aad ee Badhtamaha Magaaladda Toronto.

Waxa aan noqday askari si foojigan uga qayb-qaata baadhista denbiyada la xidhiidha la-dagaalanka maandooriyaasha ee bulshada madow oo aan markii danbe ku helay dallacaado badan.

Lix bilood ayaa galbaday, annaga oo aan dareemin sida xawliga leh ee waqtigu u rooray. Abshir waxa la soo daayey isaga gadh weyn la baxay, aadna u tabar-darnaaday. Wejigiisa waxa laga dheehan karayey uur-xumo iyo murugo badan. Wuxuu ahaa nin dareenkiisu maqan yahay oo haasawaha aad u dhibsanaya. Halkii baana ugu danbaysay waxbarasho.

Jaamacaddiina kuma laaban mar danbe. Abshir wuxu si tartiib-tartiib ah iskugu badalay gooni-socod. Waxa ka soo hadhay muran iyo hadalo cadho wata. Waxa ku adkaatay in uu la jaanqaado noloshii qoyskaga. Wax kastaba waxa ay u noqdeen wax cusub. Wuunna dhibsanayey habka aan u noolayn. Markii uu maqlay in aan la hawl-galo ciidanka Kanada aad ayuu u sii cadhooday. Waxa aan ula muuqday nin ka gaaloobay diinta Islaamka. Marar badan ayuu i maagay, anigu se waxa aan u arki jiray walaalkayo in uu dabeecad-xumo kala soo baxay saldhiggii uu ku xidhnaa.

” Show dulli maad dooran maanta? Oo maad noqon addoon ay gaalladu raranayso? Waadiga maantaba cadowgii Alle la shaqeeya,” ayuu igu diriray.

Hadaladda Abshir waxa ay ahaayeen kuwo dhanbiilo ka boodayaan. Waxa uu isku laaqayey wacyi-diimeed iyo aragtiyo-nololeed oo si qalafsan loo

hal-abuuray. Anigu dhagba jalaq uma siin. Iskumana lurin. Waxa aan lahaa dulqaadkeeda. Waayo waxaa qiyaasi karayey in noloshii walaalkayo soo maray wax weyn ka badashay hab-dhaqankiisii.

Abshir, wuxuu aad ugu jeellanaa in uu ila dagaalamo. Si lama filaan ahna ayuu mar qudha kabtiisii ula baxay dabadeedna dhankayga u soo tuuray.

Maalintaas wixii na dhex-maray ma uusan ahayn wax na farax galiey. Wuxu ahaa dareen aanan mahadin. Abshirna gurigii ayuu ka guuray isaga ii cadhaysan. Wuxuu nagu sii tiraabay dad dhaqan xun oo aan maskax fiican lahayn.

Abshir, mar danbe warkiisii ma aanan helin. Waxa aan warbixintiisii u gudbiyey ciidanka Kanada, wax jawaab ahna kama aan helin.

Muddo dheer kadib, waxa aan raad-raaciisa ka soo helay ardaydii Suudaaniyiinta ahayd ee ay saaxiibka ahaayeen. Kuwaas oo ii sheegay in Abshir u safray dalka Mareykanka.

Hooyaday aad ayay ii canaanatay dudmada Abshir. Waan u garaabayey hooyaday. Laakiin walaalkayo keligayo nama necbaan, wuxu aad u dhibsaday nolosha dalka Kanada taallay oo dhan oo uu u arkayey mid dhaqankeedu xun yahay oo aanay jirin cadaallad iyo sinnaan.

Tegitaankii Abshir waxa ay igu kaliftay in aan iska casilo jagadii aan ka hayey ciidanka denbi-baadhista ee Toronto. Waxa aan u anba-baxay dalka Mareykanka, aniga oo sita sawirka walaalkay.

Waxa aan u gudbiyey xafiiska federaalka ee denbi-baadhista Mareykanka. Xog-waraysi dheer bay ila yeesheen aniga oo dhawr jeer noq-noqonayey xafiiskooda magaalada Boston. Sawirka Abshir waxa geliyeen habka raadinta ee Mareykanka. Dhawr jeerna waxa laga baahiyey warbaahinta maxaliga ah ee dalka, cid soo sheegtayna ma aysan jirin.
Waan ku daalay raadistiisii. Wax aan deris la ahaa werwer badan oo iga hayey raacdada walaalkay Abshir. Malahayguna wuxu i farayey in uu iska beddalay baadi-soocdii.

Cidlo ayaan keli haabayey. Maraykan noloshiisa muddo dheer baa iigu danbaysay, wax macarifo ahina iima ay oolin. Waxa ii dheerayd shaqo la'aan waayo badanka shaqooyinka la ii soo bandhigay waxa ay ahaayeen shaqooyin xirfaddeyda ka hooseeya, isla mar ahaantaana qofnimadayda dhaawac ku ah.

Marar badan baan xidhiidh la sameeyey Xafiiska dhexe ee Sir-doonka Mareykanka si aan u soo ogaado halka uu sal iyo raad dhigay walaalkay. Waayo Abshir dudmadiisu wax ay ka dhalatay is-maandhaafkii na dhex maray labadayda. Waxa aan ahaa curadka reerka, waanan ku qasbanaa in aan xidho kabihii aabahay. Si joogto ah ayaan u laasimay fadhiisiga goobaha ay Soomaalidu iskugu timaado aniga oo maanka ku hayey in aan

heli doono tilmaan walaalkay ku saabsan. Wax aan ogaaday in walaalkay magaalada Minyaapulis uu diinta ka faafin jiray oo kullanadda jaaliyadda Soomaalidu ku soo bandhigi jiray qoraallo diineed iyo weliba wacyi-gelineed oo uu ugu baaqayey in diinta loo soo laabto, tilmaamayna in guushu ku jirto raacista dariiqii Nebigeenna Maxamed NNKH.

Abshir, waxa la ii sheegay in uu ka qayb-geli jiray casharrada diinta iyo muxaadarooyinka ay jeediyaan culimada Soomaalida ah iyo kuwa carabta ah. Wuxuuna waqti badan ku qaadan jiray xarunta islaamiga ee Daarul Faaruuq.

Safarkiisii xajka ee Sucuudiga in yar baa ogayd xogtiisa. Waxa ay ku qaadatay laba bilood in uu dib ugu soo laabto Mareykanka. Sida aan ku helay xogtii ciidamada ee aan markii danbe ka hawl-galay, wuxu Abshir dib u soo noqday isaga oo u eg nin ka soo laabtay waddan kale ee reer galbeed ah. Wuxu xidhnaa surwaal lugaha jeexan, garan gacmo-gaab ah, sillis dheer, dhagahana ay u sudhan yihiin xadhigga teleefan oo u muuqday qof heeso dhegaysanaya. Waxa aan se xaqiiqsaday mar danbe in ay ka ahayd indho-sarcaad iyo is yeel-yeel uu ciidanka marin-habaabinayey.

Soo guryo-noqoshadii Abshir waxa ay ku soo beegantay todobaad ka hor safarkii labaad ee Madaxweyne Obama ku tagayey Afrika. Waxa lagu hakiyey garoonka caalamiga ah ee Rochester iyada oo shaki laga muujiyey muuqaalkiisa isbedalay iyo safarka waqtiga dheer qaatay ee Sucuudiga.

Waqtigii uu ku sugnaa garoonka aad ayaa loo raajiyey, waraysi dheerna loola yeeshay. Ciidamadu waxa ay maalintaas si dheel ah u weydiiyeen su'aalo shakhsi ah oo ay qaarkood cabsi badnaayeen.

"Waxa aad ka timid Sucuudiga haddana waxad u eg tahay nin heesaa weyn ah? Muusiga ma nooca kulul baad jeceshahay?" ayuu mid ka mid ah askarta Ilaalada Xuduudaha Maraykan weydiiyey.

Askarigaas, wuxu sii daaray dhinbiilo kulul oo ka dhex shidnaa qalbiga walaalkay. Abshir aad ayuu arrintaas uga sii xanaaqay, si weyna u damqaday dareenkii huursanaa ee uu awalba ka qabay dalalka reer galbeedka.

Ciidamada sir-doonku baadhis badan ayay ku sii wadeen wallow ay u oggolaaday in uu soo laabto. Isaguna taxadar badan ayuu muujiyey muddadaas wixii ka danbeeyey. Talaabo kasta oo uu qaadi jiray way u tirsanayd, wuxuunu dareensanaa in lagu daba-jiro, oo xogtiisu ilaalo laga hayo.

Abshir, wuxu shirar badan la yeelan jiray kooxo jihaadka aad u aamminsan, waxa ayna si tifaf-tiran u soo bandhigi jireen dhibaatada Mareykanku ku hayo ummadaha Islaamka ah. Abshir waxa ku sii badatay calool-xumada uu u qabo dalka uu ku suganaa iyo weliba kii uu wax ku soo bartay ee Kanada.

Walaalkay wuxuu isku dhigayey nin qurbaawi ah oo reer galbeednimadu madaxmartay si uu u marin habaabiyo dareenadda taban ee laga qabay qofka muslinimadu ku weyn tahay. Gobolka Minisootana si dhuumasho leh ayuu ugu sii dhex noolaa muddo dheer oo kale.

Giiraanta waqtigu way rooraysay. Il-bidhiqsi kasta wuxu ahaa mid xiiso gaar ah huwan oo aan la dhaadayn goorta uu ku dhaafay. Xogaha uu xafiiskaygu isku soo ururiyey waxa ay ahaayeen kuwo amakaag leh. Rumaysigoodu ma uu hawl yarayn waxa ayna u baahnaayeen in laysku xidhiidhiyo si dhacdooyinku u noqdaan kuwo isa-sudhan.

Dib ayaan ugu soo laabtay xafiiskaygii ku dhex yiil Saldhiga Militari ee AFRICOM. Dabadeedna waxa aan furtay kombuytarkayga gacanta oo lagu soo shubay muuqaalo cusub iyo codad kala duwan oo laga soo ururiyey dadkii Abshir isku yaqiineen Mareykanka. Waa se markale iyo umuuro yaab badan. Waxa aan bilaabay in aan naftayda la shawro aniga oo xogaha aan la kulmayey ka gedisnaayeen male-awaalkayga. Mar baan idhaa, walaalka iyo idinku is maydin aqoon? May'e, malaha wax ka weyn baa haleelay oo garaadkiisii dhalen-gediyey?

Kor baan u kacay, aniga oo aan qaadi karin labadaydii lugood. Waxa aan u holladay dhankaas iyo madbakha si aan u soo samaysto bun madow, uguna diyaar garoobo baadhitaanka xogaha cusub.

Dareenkaygu wuu taagna, aamusnaan badan baan se isku sasabayey. Weydiimaha kolba maskaxdayda ku soo dhacayeyna waxa ay ahaayeen kuwo culuys maskaxeed igu sii kordhiyey oo ii diiday in aan nasto. Abshir, noloshiisii Mareykanku waxa ay ahayd mid cidhiidh badan. Wuxu ku sugnaa nolol u dhaxaysa rejo iyo baqdin. Hab-nololeedkiisa waxa si weyn u saameeyey feejignaan uu ka qabay ciidanka sir-doonka oo uu aad uga shaki qabay in ay raacdaynayaan. Go'aan cusub buu se gaadhay. Wuxu haabka gashaday in uu safro, una haajiro meel uu xasilooni-nafsadeed ku heli karo. Abshir wuxu yaqiinsaday in aanu Mareykanku ahayn meeshii uu ku qalbi-qaboobi lahaa, kunna heli lahaa nolol uu ku badhaadho.

"Waxa aan u baqoolayaa dalkaygii asalka ahaa. Ma hubo mustaqbalku waxa uu ii soo wado. Waxa se aan kugu dardaarayaa in aad haysto xadhiga Alle!" ayuu ku sii sagootiyey saaxiibkiisii Yemeniga ahaa ee Assad. Koox diineedkii uu ka tirsanaa ee Xisbul- Janna iyo asxaabtiisii Suudaaniyiinta ahayd ee uu Internet-ka kala xidhiidhi jirayna si weyn ayay u soo dhaweeyeen safarkiisa. Waxa ay u sheegeen in uu safrayo safar 'khayr badan', unna kacayo dhulkii uduga badna ee Nebi Maxamed (NNKH) ammaanay.

"Guulayso! Waxa aad tahay dirrane Rabbiy'e," ayey ku dhiirigeliyeen.

Abshir ma odorsi karin sida uu noqon doono sodcaalkiisa Soomaaliya. Bal se sawirka uu maskaxda ku haystay wuxu ahaa mid ku sidkan inta ay soo tebiso warbaahinta caalamiga ah. Taas oo uu isagu u fasiranayey in

dhulkiisa hooyo uu ka socdo jihaad lagu xoraynayo dalkiisa oo lagula dirirayo waddamo gaallo ah oo dalkiisa ku soo duulay.

Safar dheer baa u bilaabmay. Diyaaradii siday Abshir waxa ay soo cago-dhigatay garoonka diyaaradaha ee Berbera. Abshir wuxu xidhnaa koodh-dhaxmeed iyo dhar culus. Manna filanayn in cimilada Berbera ay ahayd mid gebi-ahaanba ka duwan tii uu ka yimid ee Mareykanka. Hanfi daran baa leefay, wejigiisana waxa qariyey dhibco dhidid waaweyn ah.

Cimillada uu la kulmay ma ay farax gelin. Waxa ay ku reebtay dihaal kale, degdegna wuxuu ugu anbabaxay magaalada Laas-caanood oo uu markii danbe uga sii gudbay dhankaas iyo Boosaaso.

Boosaaso cimiladeedu, waxa ay la saansaan ahayd ta magaallada Berbera. Waxa ay ahayd mid qudheedu kulayl badan oo Abshirna si weyn bay uga naxsatay. Cimilada uu la kulmay waxa kaga weynayd baadi-doonka Aabihiis oo ay ugu war danbaysay muddo toban sanno ah.

Aabo Shirre wejigiisa ilmo ayaa roortay. Wuxu galay jawi bedelan oo dareenkiis ka dhigay mid is diidsan: farxad iyo naxdin. Waayo ma filanayn in wiilkiisu marnaba soo raadsan doon. Farxad baa ka tan badatay isaga oo la dhacsan in uu wiilkiisii weynaaday oo taabbo-gal noqday.”

Abshir in uu la qabsado jewigii cusbaa ee Boosaaso ma ay ahayn mid sahlan. Waxa ka hortimid dabeecaddii cimiladda iyo af-soomaaliga oo aanu si fiican ugu xidhiidhi karin.

Aabo Shire wuxu noqday ganacsade si weyn looga tix-geliyo Boosaaso. Wuxu lahaa shirkad kalluunka ka ganacsata oo xafiisyo ku leh Boosaaso, Garoowe iyo Laas-qoray. Ganacsigaas oo si weyn uu ugu macaashay, hanti badan ka helay.

Inta badan Aabo Shire mashquul buu ahaa. Maamulka shirkadda oo keli uu ku ahaa iyo baaxada ganacsigiisa oo balaadhan baan u saamixi jirin in uu waqti badan la qaato qoyskiisa degan Boosaaso. Bal se waqtiga kooban ee joogo wuxu waraysi la yeelan jiray Abshir oo warbixinta noloshiisu xiise gaar ah u lahayd. Durba waxa isla jaanqaaday Abshir iyo Cumar-yare.

Cumar waa wiilka ugu weyn bahda yar-yar ee Aabo Shire. Wuxu ahaa wiil barashada diinta u heellan, si fiicanna u kala yaqaanay goobaha lagu barto ee Magaaladda Boosaaso. Wiil ku barbaaray dhaqan-jacayl taas oo badanka noloshiisu ku binaysnayd. Boosaaso waa magaalo-xeebeed ay ku nool yihiin dhallinyaro reer magaal ah oo ku xidhan barraha bulshadu ku wada xidhiidho. Lebiskooda, luuqadooda iyo dhaqankoodaba waxa si weyn saamayn ugu leh dadka qurbaha ku nool. Cumar waxa yaab ku ahayd in walaalkii Abshir uu ka dhaqan iyo muuqaalba duwanaa dhallinyaradii qurbaha ka soo laaban jirtay. Abshir wuxu si joogto ah ugu lebisan jiray khamiis cad iyo kabo sandal ah.

Cumar-yare aad buu u jeclaa dhaqanka Abshir ee aamusnaanta badan. Waayo waxa uu ka dhadhansayey kalgacal iyo hammuun uu u qabay barashada diinta Islaamka. Taas oo ku dhiirigelisay Cumar, in uu Abshir isku

raacaan xalqadaha diiniga ah iyo weliba muxaadarooyinka ay culimadu Soomaaliyeed ka jeediyaan Boosaaso.

Abshir waxa laga dhadhansan karayey in uu dib u hibanayo xasuusihii xuma ee uu kala kulmay Mareykanka iyo Kanada. Weedh kasta oo uu ku tiraabo waxa aan laga waayi jirin nacdal uu korka uga tuurayo qurbaha iyo waxa ku noolba. Cumar iyo Abshirba aad bay iskaga waraysan jireen marxaladihii kala duwanaa ee noloshooda, ee midna qurbaha kaga waramayey, midna duruufaha dalka yaal kaga fal-celinayey. Dareenka kacsan ee Abshir waxa markasta qaabayn jiray mawduuca muxaadirada uu ka qaybgalo. Dabadeedna la wadaagi jiray walaalkiis Cumar. Labadooduba waxa ay ka sinnaayeen aragtida odhanaysa in Muslimku ka guuray dhaqankiisii asliga ahaa, dabadeedna noqdeen daad-xoor macno badan ku lahayn geeddi-socodka nolosha casriga ah. Marar badan oo ay Abshir iyo Cumar arrintaas isla soo qaadeen, waxa ay isla qaateen in loo baahan yahay in muslimku baraarugo, jihaadna diyaar loo noqdo. Abshir iyo Cumar, inkasta oo luuqadda ay adeegsanayeen ay dhib ku haysay xidhiidhkooda wada-sheekaysi, haddana kama ay daali jirin ishoga-tusaalaynta diiniga ah ee labadooda dhex-mari jirtey xilliyadda firaaqada ay yihiin.

Maalin kasta oo Jimce ah, gaar ahaan gelinka danbe iyo caweyskii, Abshir wuxu joogto ugu xidhnaa masaajidka Al-Hidaaya. Waxa ka socon jiray muxaadirooyin taxane ah oo lagu soo bandhigi jiray ‘Sheekooyinka

Saxaabadii Jihaaday'. Waxa ay ahaayeen sheekooyin qalbi-taabad leh oo si fudud dhallinyaradda u qiiri gelin jiray. Markasta oo Abshir dhagaysto sheeko cusubna, waxa ku furmi jiray weydiimo-falsafadeed oo uu noloshiisa casriga ah ku barbar dhigayo tii asxaabtii Nebi Maxamed (NNKH)." Abshir waxa xarun u noqday Masaajidka Al-Hidaaya oo uu u ahaa goob uu ku cibaadaysto, si taxane ahna ugu xidhnaa duruusta diiniga ah ee lagu dhigo waqtiyada salaadaha Casar iyo Maqrib u dhaxayeeya. Masaajidku wuxu u ahaa goob uu kaga kaaftoomay fadhiisigii maqaaxiyaha iyo la sheekaysigii suuq-joogtada ay Boosaaso ku caanka ahayd.

Si tartiib-tartiib ah ayuu la macaamilkiisii dadku u kobcay. Abshir waxa caado u ahayd in uu xidhiidh la sameeyo sheekh kasta oo muxaadiro u jeediya si uu weydiimo hor leh ugu sii qod-qodo duruustooda. Taas oo nafsi ahaan kobcisay, kunna abbuurtay firfircooni maskaxadeed oo cusub.

Cumar wuu ka duwanaa Abshir dhanka ku xidhnaanshaha Masaajidka Al-Hidaaya. Gelinka danbe wuxu ciyaari jiray kubbada cagta oo uu ballo baas ku qabay. Salaada Maqribna waxa uu ku tukan jiray masaajidka ugu dhaw ee ay kolba salaadu ugu soo gasho. Haddana waqtiga u dhexeeya labada salaadood ee Maqribka iyo Cishaa'iga wuxu aadi jiray gurigooda si uu uga soo qubaysto mar kale.

Abshir waxa ku soo fakatay waqti firaaqo oo badan, gaar ahaan maalmaha aanay jirin duruusta diiniga ah ee sida joogta ah looga akhriyo masaajidku. Wuxu si gaar ah u jeclaysan jiray la sheekaysiga dadka masaajidka ku

xidhan oo ay iska waraysan jireen duruufaha nololeed ee dalka ka jiray iyo tii qurbaha ee uu ka soo haajiray.

Jimce ay cadceedu baalka la soo jeeday ayuu akhriskii Quraanka idleeyey. Dabadeed isaga oo kitaabkii gacanta ku sita dhex goob-yaaley masaajidkii si uu jewiga u badasho. Dhex socodkiisii masaajidku waxa ay dareen galisay sheekh masaajidka fadhiyey oo adkaar dudubinayey. Kaas oo si fudud u yiqiinsaday in Abshir aanu ahayn dhalinyaraddii reer Boosaaso ee uu kula kulmi jiray masaajidka. Markaas buu isaga oo dhoola-cadaynaya u gacan-haadiyey Abshir, kanna codsaday in uu agtiisa soo fadhiisto.

Sheekh Yuusuf Cadaad waa sheekh caan ka ahaa deegaanadda Gobolka Beri. Bal se wuxu inta badan waqtigiisa ku qaadan jiray magaaladda Gaalkacyo oo ay min-yeradiisu degnayd. Waa nin aftahamo Eebe ku galladay, si darandoori ahna afaf kala duwan ugu hadla. Af-soomaaliga, Carabidda iyo Ingiriisiduba waa iskugu mid, af walbana wuxu ugu xidhiidhi jirey si balaaqo sarre leh. Waayo qudhiisu intii aanu barashada diinta u xuub-siiban, wuxu waxbarashadii jaamacadeed ku qaatay Carriga Ingiriiska oo uu kacaankii Siyaad Barre fursad deeq waxbarasho ah ugu direen.

Abshir iyo Sheekh Cadaad way is-xog waraysteen. Si fududna Sheekh Cadaad waxa uu u aqoonsaday haybta Abshir isaga oo aan si toos ah u weydiin. Abshir weli umay dhacsanayn macnaha ay samayso maahmaahda Soomaaliyeed ee tidhaa:‘ Haybi waa summad.’ Waayo baadi-soocda uu laha ka hor imaanshihiisa Soomaaliya, waxa ay ahayd mid ku sidkan

diintiisa iyo midabkiisa. Sheekha laftigiisu, macno sal-weyn uguma ay fadhiyin ogaanshaha haybta Abshir marka laga reebo dareen-deegaaneedka jiray ee in lays toydaa tahay dhaqan la qabtimay. Sheekada Sheekh Cadaad aad bay u xiiso gelisay Abshir. Mar waxa uu uga sheekeeyey safaradiisii uu xilliyada fasax ah ku qaadan jiray Jarmalka Galbeed iyo sida ay haatan dunidu isku badashay. Marna waxa uu weydiimo falsafadeed geliyey maanka Abshir, isaga oo si dadban u duraya in Carabta waqtigani yihiin kuwo ka gaabiyeen hoggaamintii diinta Islaamka ee lagu yiqiin, loona baahan yahay in qof kasta oo Muslim ahi halgan u heensaysto. Taas oo boodhka ka tuntay dareenkii huursanaa oo uu markii Abshir qudhiisu qabay.

Waxa la moodayey in ay hal cajallad wada dhagaysteen Abshir iyo Sheekh Cadaad. Fiirsigooda casriga iyo fogaan-aragooduba waxa uu ahaa mid si uun iskugu lamaan oou eekaa in meel qudha laga wada abqaalay.

Sheekh Yuusuf Cadaad wuxu ahaa nin aad u aftahan ah oo si fudud u kasbada quluubta dadka; siiba dhallinyarta qurbaha ka timaad oo car-car badan qabay. Sheekhu wuxu safarro badan ku tagay dalalka Afgaanistaan iyo Baakistaan oo uu xidhiidh kula lahaan jiray arday ay isku barteen xilli uu waxbarasho Islaami ah oo kooban ku tagay Magaalada Karaaji/

Abshir waxa uu dhadhansan karayey fikir-diimeedka Sheekh Cadaad oo salka ku hayey caqiidada gaalaysiinta ama ‘Takfiirinta’. Waayo wuxu aamminsanaa in cid kasta oo gaalada la macaamisha iama la shaqaysaaba

yihiin gaallo ama daba-dhilif aan lahayn caqiido sugan. In la laayo oo lagu jihaadana waxa uu u arkayey masalo fudud oo diinta lagu badbaadin karo. Taas oo Abshir qudhiisu la dhacay, kunna tiraabay in ay tahay habka kaliya ee loo niyad-jebin karo cid kasta oo ehel mooda gaallada duullaanka ku ah sharafta qofka muslimka ah. Haasawihii maalintaas Jimcaha ahayd dhex maray Abshir iyo Sheekh Cadaad waxa ka soo dhex-gashay salaaddii Maqrib. Iyaga oo isku xiiso-qaba ayey ballan kale qabsadeen. Sheekh Yuusuf baa u dhaafay lambarka teleefankiisa gacanta, wuxuuna u sheegay in uu la soo xidhiidhi si uu ugu martiqaado gurigiisa ku yaal magaalada Gaalkacyo.

Dhawr dharaarood oo danbe ayuu Abshir ka sii fakarayey weedhihii waannada lahaa iyo hadalladii xamaasadaysnaa ee Sheekh Yuusuf Cadaad. Abshir wuxu yaqiinsaday in Sheekhu waayo-arag u yahay nolosha qurbaha tiil iyo ta dalka gudihiisaba. In uu sii joogteeyo xidhiidhkiisa, Abshir xiiso weyn buu u qabay.

Aabo Shirre inta badan isma ay arki jirin wiilkiisa Abshir. Waxa ku badnaa safarada ganacsi ee uu ku tagi jiray deegaanadda kale duwan ee Gobolada Sanaag, Beri iyo Nugaal. Ganacsigiisa Kalluunku wuxu ahaa mid aad u suuq badan, shirkaddiisuna waxa ay u kobcaysay si xawli sare leh. Aabo Shirre wuxu filanayey in wiilashiisa, gaar ahaan Cumar-yare iyo Abshir, ay la maamuli doonaan ganacsiga bal se waxa ay ahaayeen niman aan u heelanayn amuuraha ganacsi ee aabahood waday.

Xidhiidhka Abshir la lahaa Sheekh Cadaad ma uusan joogsan. Waxa ay ku wada xidhiidhi jireen teleefanka gacanta xilliyada salaada Cishaa'i ka danbaysa. Abshir wuxu go'aansaday in uu safar kooban ku tago magaalada Gaalkacyo si uu mar kale qayb uga noqdo dacwadaha uu Sheekhu waday. Lama wadaagin xogta rasmiga ah ee safarkiisa Aabo Shire iyo Cumar yare. Keliya waxa uu u sheegay Cumar iyo aabo Shireba, in uu ugu baxayo safar tabliiqinnimo Gobolka Mudug oo uu rabo in uu aqoontiisa diinta ku soo xoojiyo. Cumar-yare wuu jeclaa in uu walaalkii ku weheliyo safarka waxa se maalmahaas u bilaabmay duruustii waxbarasho ee uu muddada fasax gaaban kaga maqnaa.

Abshir sahay badan ma sidan. Wuxu filanayey in aanu safarkiisa Gaalkacyo ka badnaan doonin laba caano-maal. Sidoo kale wuxu naawilayey in aanu guriga Sheekh Yuusuf ku sii nagaan doonin ee uu isla maalinta labaadba u hurdo tagi doono masaajidka ugu dhaw.

Safarka Abshir wuxu ahaa mid uu ku dal-baranayey. Dhulka bannaan ee dhirtu ku yar tahay iyo cimiladda kulaylaha ah ayuu aad ula dhacsanaa. Waxa aad ula yaabay dadka saboolka ah ee deegaanada uu maray iyo farxada wejiyadooda laga dheehan karayey. Dad wax la'aantu aanay niyad-semidooda waxba ka badalin oo lahaa qab iyo qiyam wacan ayuu la kulmayey. Sheekh Yuusuf Cadaad baa si joogto ah teleefankiisa gacanta uga soo hagayey Abshir. Sheekhu waxa uu dareensana in Abshir ka baqo qabay safarkiisa

Gaalkacyo wallow uu jeclaysanayey. Dadka gaadhiga la saarna weydiimo hor leh ayey ku darandoorinayeen Abshir iyaga oo uga jeeday in ay haasawe la sii yeeshaan.

Abshir wuu la yaabay nolosha cusub ee Gaalkacyo. Waa magaalo si walba uga duwan Boosaaso oo dadku hadalo dhaadheer yihiin, markastana la moodo in ay is dirirayaan. Sheekh Cadaad baa ka soo doonay istaankii gawaadhida, dabadeedna ku qaaday gaadhi 'Surf' ah. Abshir wuxu dhawr jeer ka soo hor baxay niman qoryo xambaarsan oo aan haddana dirays ciidan wadan. Waxa uu ka shaki qabay in aanay magaaladu u xasiloonayn sida Boosaaso, maamul si toos ah magaaladda gacanta ugu wada hayaana jirin. Abshir labadii cisho ee u qorshaysnaa waxa ay isku badaleen laba bilood. Maalinba maalinta ka danbaysa ayuu xiisaha uu u hayey magaaladda Gaalkacyo iyo duruusta Sheekh Cadaad sii kordhayeen. Sheekhu qudhiisu aad buu u jeclaa maskax-furnaanta Abshir ee sida fudud ula jaan-qaaday xalqadaha sida joogtada ah ugu tebiyo dhallinyarada magaaladda ee ku xidhan Masaajidka Al-quba.

Abshir waxa u bilaabamay nolol kale oo cusub. Duruustii badnaa ee dhinaca keliya ku qotamay, kunna saabsanaa jihaadka iyo la-dirirka gaallada, ayaa si weyn u saaqday, oo hab-fakarkiisa la xidhiidha diinta u sii leexiyey dhinaca jihaadka. Isaguna ma heli jirin waqti firaaqo oo naftiisa kula sheekaysto, jawaabona ugu helo is-barbar dhigga waqtiga casriga ah iyo duruufihii jiray xilligii diinta Islaamku ugubka ahayd.

Mar kale ayey dib u kala lumeen Abshir iyo Aabo Shire.

Abshir baa si ku talo-gal leh u tuuray teleefankiisii gacanta, si aanu mar danbe ugu laaban Boosaaso, xidhiidhkiina u jaray bahdaydii yar-yarayd. Waxa jiitay dhallinyaro firfircoon oo Sheekh Cadaad si gaar ah u layliyey, uguna diyaariyey in qayb ka noqdaan dib-u-curashada Soomaaliya kale oo diinta lagu maamulo, gaalladana laga sifeeyo.

Abshir mar danbe ayuu xaqiiqsaday in Sheekh Yuusuf ahaa madaxa abaabulka dhallinyarta iyo wacyi-gelinta ee Al-shabaab u qaabbilsan gobolka Mudug. Abshir sidii ayaa ugu danbaysay reerkoodii, mar danbena kuma laaban. Shuqul danbena kuma yeelan cid danbe oo ka soo raadisa.

Saddex bilood kadib ayaa Abshir iyo kooxdii dhallinyarta ahayd si dhuumasho ah loogu gudbiyey magaalo-xeebeedka Cadale ee Gobolka Shabeellaha Dhexe. Sheekh Cadaad si gaar ah buu ula dardaarmay Abshir, wuxuuna guntiga ugu guntay in liibaantu aanay ku jirin dunida guudkeeda waxa saran ee ay jirto dhinac aakhiro. Ta aakhirona ay tahay ta rasmiga ah ee lagu negaanayo, laguna helayo nolol sinnaan iyo cadaalad ku qotonta.

Abshir wuxu ka mid noqday dhallinyaro qurbaha ka timid oo lagu daray liiska xubnaha ka hawlgala Waaxda Ammniga u qaabilsan Kooxda Al-shabaab. Gaar ahaan wuxu ku biiray koox cusub oo si gaar ah loogu tabarayey in ay fuliyaan qaraxyada is-miidaaminta ah ee gobolada Koonfurta iyo Badhtamaha Soomaaliya. Wuxu galay leyli-jabhadnimo oo

adag. Leyligaas oo uu ku qaadan jiray dhul buuraley ah oo dhagaxaan badan, ka hor inta aanay qoraxdu soo bixin. Mararka qaar waxa loo qaadi jiray dhulka beereedka webiga Shabbeele ku teedsan. Halkaas oo uu kulano kula qaadan jiray qaar ka mid ah madaxda u saraysa Al-shabaab, looguna dhigi jiray duruuso kale oo ku saabsan naf-huridda iyo ka-xorowga duullaanka gaallada.

Abshir waxa ay si dhaw iskugu xidheen tababare lagu naanaysi jiray Abu-Xasna. Kaas oo ahaa nin da' dhexe ah oo aad u dhiiran, wejigiisana markasta qarin jiray. Wuxu waxbarashadiisa la xidhiidha cilmiga kiimikada ku diyaariyey Wadanka Norway, oo uu dhalasho ahaan ka soo jeeday.

Marnaba looma sheegi jirin meesha uu Abshir weerar ku noqon doono iyo dadka uu ku duulayo, midnaba. Tababare Abu-Xasna waxa lagu amray keliya inuu ku leyliyo sida layskugu darro walxaha qaraxa dhaliya iyo habka layskugu rakibo.

Abshir, muddadii uu dhuumalaysiga ku jiray waxa uu guursaday gabadh da' yar oo lagu magacaabi jiray Kaltuun oo dhalasho ahaan ka soo jeeday deegaanadda Kismaayo. Gabadhaas oo ay wada noolaayeen intii uu tababarka ku jiray ee uu tegi jiray kaymaha ku yaal agagaarka Webiga Shabeele. Kartida hoggaamineed ee uu Abshir muujiyey iyo weliba dhiiranaanta iyo hal-adaygnimada uu la yimidba, waxa ay soo jiidatay indhaha hoggaanka sarre ee Al-shabaab. Taas oo uu markii danbe madax looga dhigay dhallinyarta jihaad-doonka ah ee qurbaha ka soo qul-

qulaysay; looguna sheegay in si lamid ah sidii loo siiyey iclaanka diimeed, iyagana uu u laqimo casharada jihaadka ku saabsan.

Nolol-maalmeedkiisu waxa ay ku koobnayd tun-ku-qaadista qoriga AK-47, oo aanu gacanta iyo keebka kala fogayn jirin. La-jooggiisa asxaabtiisa cusub iyo dhagaysiga nashiidooyin Islaami ah ayuu waqtiga firaaqada ku lumin jiray.

Abshir, aad buu u akhrisan jiray Quraanka iyo weliba buugaag af-Ingiriisi ku turjuman oo ku saabsan gaalaysiinta. Subaxdii timaadaba waxa loo daari jiray muxaarooyin af-ingiiriis ku baxaya, oo si xeel-sare leh uga waramaya dhibaatada haysta muslimka maanta nool. Waxa kolba la xasuusin jirey in uu aakhiro nolol fiican geli doono, isla markaana uu la kulmi doono Xural-cayn, adduunkana kaga tegi doono lib iyo gobannimo.

Abshir waxa uu toosay inyar ka hore hiirtii waaberi. Dhaxan daran baa jirtay oo qofka u diidaysay in uu weysaysto, waa se uu ku qasbanaa in uu si uun maaro ugu helo. Laba rakacdood oo sunne ah ayuu ku tukaday mawlac ku dhex yiil xerada uu ku noola. Dabadeedna salaaddii subax buu ku xigsiiyey markii ay jamaacadii soo buuxsantay.

Mawlicii buu ku sii negaa oo uu ku akhrisanayey adkaar badan iyo aayado quraan ah ilaa diiggu cidii joojiyey. Abu-Xasna oo qori AK-47 ah xanbaarsan ayaa soo is-taagay afaafka hore ee mawlaca uu Abshir ku cibaadaysanayey. Suul-dhabaale ayuu ku soo jeediyey Abshir oo qushuuc la gadhoodhsan.

“Abshir, maanta waa maalintaadii. Waa maalinkii adiga iyo asxaabtii Nebi Maxamed (SWC) aad kulmi lahaydeen?” ayuu Abu-Xasna dhagta ugu riday Abshir. Xerrada waxa horteeda gaardis ku ciyaarayey dhallinyaro badan oo afka dabooshay, kunna hadaaqaya nashiidooyin carbeed. Gaadhi weyn oo nooca xamuulka ah ayaa ku sugnaa goob u dhaw mawlaca uu Abshir ku tukanayey. Abshir dib buu ugu laabtay mawlicii, dabadeedna mar kale laba rakacadood ka gaadhsiiyey.

Abshir, hore ayuu u hayey xogta goobta loo asteeyey. Mar kale ayuu dardaaran kale uu siiyey Abu-Xasna isaga oo kolba dib u xasuusinaya nolosha lagu waarayo ee aakhiro iyo u anbabaxid Abshir ee hoygiisii rasmiga ah.
Wuxu ujeestay dhinaca waddada waqooyi ka gasha Xamar. Abaartiisuna waxa ay ahayd Hudheel Dal-jir, oo tiraba afar jeer si dhuumasho ah u yimid xilliyo kala duwan, qaxwena ku cabay goobo kala duwan oo isla hudheelka ah.

Abshir suunka ayaa u xidhanaa, waxaana ku baxayey heeso diini ah. Waa isla heesihii lagu toosin jiray subax kasta, ee qiirada gelin jiray. Il-bidhiqsi kasta oo uu socdo gaadhigu, xawaaraha ayuu kordhinayey, isaga oo Abshir xasuusan nolosha danbe ee sugaysa. Nolol uu in badan ku taamayey, oo uu sii saadaalinayey barwaaqadeeda!

Isbaaro kasta oo gaadhigiisa lagu joojiyo, ma ay dhaadayn walxaha qaraxa ee gaadhiga laga buuxiyey. Waayo dushiisa waxa lagu buuxiyey raashin iyo

khudaar tiro badan oo lagu dul-cabeeyey walxaha qaraxa loo diyaariyey. Gadaal waxa saaran kuray kirishbay ah oo isna loo diyaarshay in Abshir la socodsiiyo deegaanadda ay kolba ka gudbayaan iyo dabeecadaha cusub ee ay kolba la kulmayaanba. Sodcaal qaatay shan saac kadib, Abshir waxa uu soo gaadhay iridda hore ee Hudheel Dal-jir. Waa xilligii loo diyaargaroobayey qadada. Waxaana hudheelka ku sugnaa xildhibaano iyo saraakiil dawlada ka tirsan oo maalmahaasi aqoon is-weydaarsi la xidhiidha curinta xeerka caasimada lafo-gurayey.

Halkii buu isaga iyo gaadhigiiba ku dhex qarxeen, oo uu ku miray martidii Hudheel Dal-jir.

Abshir maanta waa iga hooseeya. Wuxuu se sahayday nolosha dad badan oo rayid ah oo diin-wadaag la ahayd. Sidaas baan walaalkay ku kala tagnay adduunka guudkiisa. Waanna qaddar Alle iyo fakar qaloocday.

Anfariir awgeed baan gacmaha dhafoorka saartay.

Waayo marnaba maskaxdayda ka gudhay muuqaalada iyo xusuusaha is-burinaya ee kolba i hor imanayey. Waxa aan isku maararawsiiyaa sawirradii aanu wada galnay markii aanu yar-yarayn ee aanu Magaallada Toronto u soo guurnay. Walaalkay oo dhabarkayga saaran, foolkiisana ay ka muuqato farax iyo raynrayn badan. Waa sawirro aan aan ka helay Sanduuqayga Keydka Sawirrada.

Ballankii Kabtan Riijadh ee bandhigga xogaha aan isku duba-riday ayaa maanta ku eeg. Waxaana hoolka Saldhigga AFRICOM igu sugayey saraakiil aanu shaqo-wadaag ahayn, qaarkoodna aanan weligayba kulmin oo u dhag taagaya xuuraanka xogaha aan ku mashquulsanaa lixdii bilood ee ka danbaysay qaraxii Hudheel Dal-jir.

Afar caano-maal kadib, waxa aan dib ugu laabtay Muqdisho. Waxa aanan dalbaday fasax kooban oo nasasho ah. Naftaydu waxa ay rabtay degnaasho iyo in aan ka nasto culayskii nafsadeed ee aan wehelka la ahaa dharaarihii qadhaadhaa ee nolashayda u danbeeyey. Waxa ay ahaayeen lix bilood oo dhamac igaga kulul, lix sanadoodna ka dherer badan. Jimce ay qoraxdu korkayga taagan tahay, badduna neecaw diiran soo afuufaysay, ayaan u dabaal tagay Xeebta Liido. Waxa aan iska maydhayey walaac badan oo igu soo kadiyey. Baddu se way iga diiday in ay iga dhaqdo werwerkaas aan kelida ku ahaa. Bataax ayaan is-tuuray, oo aan cadceeda isku dhigay. Cabbaar markaan indhaha is geliyey, gacmahana kala baxshay, ayaan ku hanbabaray rasaasta talan-taaliga u dhacaysa. Kor markii aan u boodayn, mise jilibka ayey xabbaddii iga haleeshay.

Waxa ay ahaayeen dhallinyartii Kubbadda wada cayaaraysay oo isku cadhootay, dabadeedna rasaas isku adeegsaday. Maalintaas Ilaah baa i baxshay, oo maalin kale ii dhigtay. Haddimada noocan ah nafdayda ayaa qabatintay, waxaan se niyada sasabo uga dhigaa in aan ahay ka ugu dhibka yar maanta xaaladda ka jirta Muqdisho.

DHAMMAAD.